



BUFFALO PUBLIC SCHOOLS

Office of the Superintendent

65 Niagara Square Room #712 City Hall

Buffalo, New York 14202

Phone (716) 816-3575 * Fax (716) 851-3033

krincash@buffaloschools.org

Juun 16, 2021

Salaan ku socota Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Buffalo iyo Qoysaska,

Laga bilaabo Sebtember 8, 2021, rajadeena ayaa ah in dhammaan ardayda Dugsiyada Dadweynaha Buffalo ee fasalada Pre-K - 12 ay ku noqon doonaan waxbarista shaqsi ahaaneed shan maalmood usbuucii, iyagoo raacaya tilmaamaha Xarunta Xakamaynta Cudurrada ee Waaxda Caafimaadka ee Gobolka New York. Xilliga Xagaaga, shaqaalaha Degmadu waxay u shaqeyn doonaan si hagar la'aan ah si loo hubiyo in canuggaagu ku soo laabto jawi dhisme oo caqli iyo dhaqanka ahaan ammaan ah oo soo dhaweyn leh!

Waxaan kula socodsiiyaa qorshayaashan hada, maadaama ay muhiim kuu tahay inaad qorsheyso oo aad u diyaar garwdo sanad dugsiyeedka soo socda. Isla marka, Degmadu waxay dhisi doontaa jadwalada ardayda, waxay diyaarin doontaa dhismayaasha dugsiyadeena, isku dubbaridi doontaa gaadiidka, iyo qorsheynta hawl-gelinta iyo jadwaleynta shaqaalaha oo dhan.

Haddii aad tahay waalid ama daryeele arday ku cusub Dugsiyada Dadweynaha Buffalo, fadlan hubi inaad booqato www.buffaloschools.org oo aad hoos ugu dhaadhacdo calaamadda "Student Placement and Registration" ama Meelaynta Ardayda iyo Diiwaangelinta" si aad u hesho tilmaamo sahlan oo lagu diiwaangelinayo ilmahaaga si loogu qoro.

Carruurta oo dhan si otomaatig ah ayaa loogu qori doonaa si waqti-buuxa ah, waxbarid shakhsiyeed oo shan maalmood usbuucii ah. Waxbarashada fog waxaa loo fidin doonaa oo **keliya** ardayda leh ka-dhaafitaanka caafimaadka ee u-qalma ka dib marka lala tashado xirfadlayaasha caafimaadka iyo shaqaalaha Degmada.

Haddii aad codsanaysid in ilmahaaga lagu qoro barasho fog oo ah ka dhaafis caafimaad awgeed inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2021-22, **waa inaad** keentaa macluumaadka soo socda:

- Dukumiinti caafimaad oo ku taariikheysan **1-dii Luuliyo, 2021**, kuna qornaa warqad dhakhtar, oo uu saxiixay xirfadle caafimaad
- Codsiyada waa in lagu soo diraa emaylka ahaan medicalexemptions@buffaloschools.org ama loogu soo diraa boostada (U.S mail) oo lagu hagaajinayo Dr. Sharon Brown, Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Adeegyada Taakulaynta Ardayda; 427 Hall Hall, Buffalo, NY 14202

Waa lagu soo ogeysiin **doonaa** in dalabkaaga caafimaad ee barashada fog la aqbalay iyo inkale.

Waqtiigan xaadirka ah, waxaan ku faraxsanahay inaan qoysaska siino fursado badan oo taageero, dardar gelin iyo ka qayb gelin xagaagan ah! Dugsiga Xagaaga 2021 wax buu u hayaa qof walba. Diiwaangelintu way furan tahay hadda! Waxaan ku dhiirigelinayaa qoysaska inay ka faa'iideystaan barnaamijkeenna xagaaga ee xoogan. Waalidiintu waxay la xiriiri karaan iskuullada (ilmahooda) si ay isu diiwaangeliyaan ama waxaykala xiriiri karaan Waaxda Waxbarashada Dheeriga ah "Department of Extended Learning" (716) 816-4006 ama summerschool@buffaloschools.org. Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heli kartaa websaydhkeena.

Ardayda iyo qoysaska ayaa ah ahmiyadeena ugu sareysa, iyo guusha ardayga ayaa horseedeysa go'aan kasta oo aan qaadanno. Waan kula socodsiiin doonaa haddii ay khasab noqoto inaan wax beddel ah ku sameyno Qorsheheenna Dib-u-furista ee 2021 iyadoo lagu saleynayo tilmaamaha cusub ee federaalka iyo gobolka.

Wixii warar ah ee kusoo kordha waan idinla socodsiiin doonaa marka aan horay u socono. Waxaan kugu dhiirigelinayaa, haddii aadan horey u helin, inaad si buuxda u tallaasho sida ugu dhakhsaha badan. Waxaan rajeyneynaa sanad-dugsiyeed nabadgelyo, guul, iyo isbeddel leh 2021-2022. Hel xagaa raaxo leh!

Si Xushmad leh,

Dr. Kriner Cash
Kormeeraha Guud

"Putting Children & Families First to Ensure High Academic Achievement for All"